



Ma khasab baa inaan cusboonaysiiyo Kaarkayga Caafimaadka MA ama MinnesotaCare?

Do I have to renew my Medical Assistance (MA) or MinnesotaCare?

Ma u baahnahay dib u cusboonaysiin?

Haa. Cid walba oo ku jirta kaarka MA ama MinnesotaCare waa khasab inay cusboonaysiiso sannad walba. Waa inaad hesho ogaysiis kuu sheegaya marka ay tahay inaad cusboonaysiiso. Haddii aadan cusboonaysiinta ku sameynin waqtigii loogu talagalay, waxa aad waayi kartaa kaarkaaga caafimaadka.

Maxaan iminka sameeyaa?

- **Hubi in akhbaartaada la soo xiriiridu ay sax tahay. Arrintani waa mid aad muhiim u ah!** Dhamaan akhbaarta cusboonaysiinta boostadda ayaa lagu soo dhigi.
 - Haddii adiga ama cid kale oo qoyskaaga ahi ay haysato kaarka MA, la xiriir degmadaada ama qabiilka aad ka tirsan tahay si aad u cusboonaysiiso akbbaartaada la soo xiriirida.
 - Haddii aad haysato kaarka MinnesotaCare, ka wac hay'adda DHS khadka ah 651-297-3862 ama 800-657-3672.
- **U toog hay boqshad leh Dhibic Madow.** Foomka cusboonaysiintu waxa uu ku jiraa boqshad leh dhibic madow. Markiiba fur buuxina foomka. U soo dir ciwaanka ku qoran warqada kore. Hubi inaad soo diro waqtiga la iska rabo in la soo diro! Eeg qaybta ugu dambaysa ee, “Xaggee ka heli karaa akhbaar kale ama caawimaad?”

Waa goorma marka ay tahay inaad cusboonaysiiyo?

Waxa ay ku xiran tahay taasi inaad haysato MA ama MinnesotaCare.

Haddii aad haysato MA

Cusboonaysiintaadu waa sannad-guuradda kolkii aad bilowday helida MA. Waqtiga kama dambaysta ah ee ay tahay in foomka la soo celiyaa waa bil ka hor maalintaa.

- Foomka cusboonaysiintu waxa uu ku yimaadaa boostadda qiyaastii labo bilood ka hor kolka la iska rabo cusboonaysiinta.
- Si taxadar leh u akhri. Waxa aad u baahan tahay inaad hubiso inaad haysato dukumiintaddu aad u baahan tahay.



- Foomka cusboonaysiinta iyo dukumiintiyaddu waxa u baahan yihiin in loo diro degmadaadda ama qabiilka aad ka tirsan tahay ugu dambeyn waqtiga kama dambaysta ah ee ay ku siiyeen ee la rabo in la soo celiyo.

Tusaale ahaan: Haddii markii kuugu horeeysay aad codsatay kaarka MA bisha Luulyo dhowr sanno ka hor, cusboonaysiintaaddu waa khasab in la sameeyo bisha Luulyo ee sannadkan. Waa inaad hesho foomka cusboonaysiinta bisha Maajo. Waa khasab inaad buuxiso aadna soo dirto foomka cusboonaysiinta kowda bisha Juun. Hay'addu waxa ay qaban hawsha cusboonaysiinta si ay eegto inaad wali xaq u leedahay MA iyo in kale. Waa khasab inay soo dhameeyaan hawshaada ugu dambayn maalinta ugu dambeysa bisha Juun si aad u ugu sii jirto kaarka MA.

Aad ayey muhiim u tahay in aad buuxiso soona dirto foomkaaga cusboonaysiinta markiiba. Degmada ama hay'adda qabiilku waxa ay u qabtaan hawlaha cusboonaysiinta sidda ay u kala hor helaan warqadaha.

Haddii aad haysato kaarka MinnesotaCare

Cusboonaysiintaaddu sannad walba waa Janaayo 1. Foomkaaga cusboonaysiinta waxaa boostadda la soo dhigi bisha Nofeermbar. Waa khasab inaad soo dirto foomkaaga oo buuxsan kowda bisha Deseembar.

Haddii qof ka mid ah qoyskaagu uu haysto kaarka MA qof kalena uu haysto kaarka MinnesotaCare

Kaarka MA waxa uu u baahan yahay in loo cusboonaysiiyo si la mid ah sidda kor ku xusan. Waxa aad ku heli dhamaan ogaysiisyadda iyo foomamka boostadda. MinnesotaCare waxaa laga yaabaa in loo baahan yahay in la cusboonaysiiyo aakhirka sannadka. Laakiin marmarka qaarkood isla akhbaarta loo isticmaalay MA ayaa loo isticmaali karaa MinnesotaCare cusboonaysiintuna iskeed ayey u dhacdaa iyadoon waxba la sameyn. Hay'adda ayaa ku soo ogaysiin ah in la cusboonaysiiyey.



Maxaan u baahnahay si aan u cusboonaysiiyo kaarkayga caafimaad?

Haddii aad u baahan tahay caawin ku saabsan cusboonaysiinta kaarka, wac ama emayl u dir Barnaamijka Daryeel (Project Care) si aad uga hesho **caawimaad bilaash ah** xiriiriye sharciyeysan oo MNSure u shaqeeya: 320-253-0121 ama projectcare@mylegalaid.org.

Waxa aad cusboonaysiin kartaa kaliya adigoo isticmaalaya foomka warqadda ah. Ka jawaab dhamaan su'aalaha foomka ku qoran oo dhan. Waxaad kaloo u baahan tahay inaad soo dirto dukumiintiyada si aad u cadeyso akhbaartaadda. Si aad diyaar u noqoto, hubi inaad haysato waxyaabahan soo socda:

- Warqadaha canshuur celintii ugu dambaysay ee aad xaraysay
- Dabadda jeegta ee cid walba oo qoyskaaga ka mid ah oo shaqeysa
- Warqad laga keeno xafiiska Sooshaal Sakuuratiga (Social security)

- Warqad ku saabsan dakhliga lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo
- Warqaddo kale oo cadeynaya dakhligaaga

Haddii aad tahay qof waayeel ah ama indho la' ama naafo ah, waa khasab siddoo kale inaad cadayso in hantida aad leedahay ay ka hooseeyso xadka loo ogol yahay tiradda dadka qoyska. Iminka, taasi waa \$3,000, 1-kii qofba ama \$6,000 qoyskii 2-qof ah.



Maxaa dhici haddii aanan cusboonaysiin kaarkayga caafimaad?

Haddii aanan cusboonaysiin kaarkaaga caafimaad ka hor inta uusan dhicin, waxaa dhici karta inaad kaar caafimaad la'aan noqoto. Waa muhiim inaad ku cusboonaysiiso kaarkaaga waqtigii loogu talagalay in la cusboonaysiiyo, si kolkaa aadan marna u noqon kaar la'aan.

Siddoo kale iyana waa muhiim inaad sameyso cusboonaysiinta xataa haddii aadan u malaynayn inaad xaq u leedahay kaarka iminka. Hay'adda ayaa eegi codsigaaga si ay u aragto inaad xaq u leedahay kaar kale oo caafimaad oo ay bixiso degmaddu, hay'adda DHS ka ama MNsure. Waxa aad heli ogaysiis ku sheegaya kaararka laga yaabo inaad hesho iyo waxa aad u baahan tahay inaad sameyso si aad isu-qorta kaararka.

Haddii aad u baahan tahay inaad gasho kaar caafimaad oo shaqadaadda ama MNsure ay bixiso, waxa aad heli ogaysiis oranaya inaad xaq u lahayn hadda wixii ka dambeeya kaararka MA ama MinnesotaCare. Ha xoorin ogaysiiska! Waad u baahan tahay waayo waxa uu ku siin muddo isqorideed oo gaar ah. Waxa aad ugu baahan tahay taa si aad uga hesho kaar caafimaad shaqadaadda ama MNsure haddii mudaddii isqorda la dhaafay. Haddii aanan sameyn cusboonaysiintaada adigoo helay ogaysiiska cusboonaysiinta, waa khasab inaad sugto ilaa iyo marka xigta ee isqoraddu ay furmayso si aad u hesho kaar caafimaad.

Maxaan u baahnahay inaan sameeyo ka dib kolkaa aan cusboonaysiiyo kaarka?

Waxaa u baahan tahay inaad soo sheegto wixii is-bedelka ah ee ku soo kordha qoyskaaga ee saameyn kara xaq-u-yeelkaaga. Haddii aad ku jirta kaarka MA ama kan MinnesotaCare, waa khasab inaad soo sheegto isbedeladan soo socda:

- **Ciwaanka** – haddii aad guurto, ama aad bedesho ciwaankaaga
- **Dakhliga** – sidda haddii aad shaqo cusub hesho, shaqo ka tagto, ama lacagta lagu kordhiyo, lagu ogolaado lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo
- **Tiradda dadka qoyska** – sidda haddii uu ilmo kuu dhasho, qof idin la soo dago ama idin ka guuro, guur ama furiin dhaco, ama ciddi dhimato
- **Martabadda canshuur xareynta**
- **Martabadda sharciga (immigration)** – sidda haddi adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi uu noqdo muwaadin (citizen) ama uu helo sharci deganaansho rasmi ah

- **Martabadda sharciga (immigration)** – sidda haddi adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi uu noqdo muwaadin (citizen) ama uu helo sharci deganaansho rasmi ah
- **Kaar caafimaad** – sidda haddii qof uu ka helo kaar caafimaad shaqo
- **Akhbaarta shakhsiyanka ah** – sidda magac bedelid
- Aad noqoto **naafo**

Haddii aad haysato kaar MA, ku wac degmadaada ama xafiiska qabiilka **10 cisho** gudahood kolka uu isbedelku uu dhaco.

Haddii adiga ama cid kale oo qoyskaaga ahi ay haysato kaarka MinnesotaCare, ku wac Khadka Akbaarta MinnesotaCare (MinnesotaCare Information Line) ee ah 651-297-3862 ama 800-657-3672 **30 cisho** gudahood kolka uu isbedelku uu dhaco.

Haddii uu qoyskaagu uu leeyahay dad isku jira ah oo haysta kaararka MinnesotaCare ama MA, raac xeerarka MA kuna wac degmadaada ama xafiiska qabiilka **10 cisho** gudahood kolka uu isbedelku uu dhaco.

Ka waran haddii aan u diro wax walba oo ay i waydiisteen laakiin wali ay xirayaan kiiskayga? Haddii kaarka MA ama MNCare uu xirayo kiiskaaga laakiin aad siisay degmada (county) wax kasta oo ay ku waydiisatay, waxa aad qaadan kartaa racfaan. Racfaanka qaado ka hor maalinta ugu dambaysa bisha ama 10 cisho gudahood kolka aad hesho ogaysiiska xiritaanka ah. Si kolkaa aad u sii ugu sii jiri karto kaarkaaga caafimaad inta racfaankaaga laga go'aansanayo.

Wixii akhbaar ah iyo helida caawimaad racfaanadda ah, ka hel xafiiska gargaarka dhanka sharciyadda (legal aid) ee khadkiisu yahay 1-(877) 696-6529 ama gal bogga [DHS health plan appeals page](#).

Xaggee ayaan ka heli karaa akhbaar kale ama caawimaad?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan cusboonaysiinta kaarkaaga caafimaad, Waxa aad awoodaa:

- Inaad wacdo ama email u dirto Barnaamijka Daryeel ([Project Care](#)) si aad **caawimaad bilaash ah** xiriiriye sharciyeysan oo MNsure u shaqeeya: 320-253-0121 ama barta projectcare@mylegalaid.org
- Booqo shabakadda (website) Cusboonaysiinta Kaararka Caafimaadka ee Hay'adda DHS ee ah <https://mn.gov/dhs/renewmycoverage/>
- Ka daawo muuqaal kooban oo YouTube ku jira oo uu leeyahay Barnaamijka Daryeel oo Cusboonaysiinta MA da ka hadlaya ([Project Care MA Renewals video](#)).

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.